Waxaa laga soo turjumay af-Iswiidhish

Sidan ayaa Iswiidhan loo xukumaa

Xukuumadda iyo Xafiisyada dowladda

Ra'iisul wasaaraha iyo golaha wasiirrada
Sidan ayey xukuumaddu u shaqeysaa
Sidan ayey xafiisyada dowladdu u shaqeeyaaan
Hawlaha xafiisyada dowladda
Hey'adaha dowladda
Geeddi socodka miisaaniyadda
Geeddi socodka sharci dejinta

Hannaanka bulshada ee Iswiidhishka

Nidaam dimuquraadi ah oo leh doorasho xor ah
Hannaanka maamulka ee Iswiidhishka – seddax heer
Shuruucda aasaasiga ah ee Iswiidhan
Xuquuqda bani'aadanka
Sinnaanta ragga iyo dumarka
Bannaanyaalnimada
Wakiillada
Koontaroolidda dowladda

Iswiidhan iyo Caalamka

Iswiidhan iyo Midowga Yurub
Iswiidhan iyo Qaramada Midoobay
Iskaashiga Waddamada Woqooyinka Yurub

Sidan ayaa Iswiidhan loo xukumaa

Xukuumadda iyo Xafiisyada dowladda

Ra’iisul wasaaraha iyo golaha wasiirrada

Doorasho kasta ka dib wuxuu guddoomiyaha baarlamaanku soo jeedinayaa ra’isu wasaare cusub. Barlamaanka ayaa dabadeed dooranaya ra’iisul wasaaraha oo u xil saaraya in uu xukuumad soo dhisyo. Xukuumadda uu ra’iisul wasaaruhu hoggaamiyo ayaa Iswiidhan xukumaysa. Xukuumaddu waxaa ay ka koobantahay ra’iisul wasaaraha iyo golaha wasiirrad, micnaha wasiirroo uu mid walba aag mas’uul ka yahay.

Sidan ayey xukuumaddu u shaqeysaa

Xukuumadda ayaa Iswiidhan xukunta oo ah matoorka wada shaqada ku aaddan sameynta iyo beddelidda xeerarka, sidaasna waxaa ay si weyn ugu saameyn kartaa horuumarka bulshada. Laakin xukuumadda waxaa la xisaabtamaya baarlamaanka, waana in ay haysataa taageerada baarlamaanka si ay siyaasaddeeda u fushato.

Xukuumaddu iyada ayaa waddanka xukunta, taasoo ka dhigan in xukuumaddu ay tusaale ahaan:

- Hindisiyooyin ku aaddan xeerar soo hor dhigeyso baarlamaanka
- Meelmarineyso go’aamanka baarlamaanka
- Ka mas’uul ay miisaaniyadda uu baarlamaanku ansaxiyo
- Iswiidhan ku meteleyso Midowga Yurub
- Heshiisyo la geleysa dowlado kale
- Xakameyneyso hawlaha xukuumadda
- Go’aan ka gaareyso qaar ka mid ah arrimaha maamulka ee aysan hey’ad kale oo xukuumadeed mas’uul ka ahayn.

Isbeddellada ay xukuumaddu dooneyso in ay fuliso waxaa lagu qorayaa hindise, waxa loogu yeero soo jeedin, oo loo gudbinayo baarlamaanka si uu go’aan uga gaaryo. Sidoo kale xukuumadda ayaa ka soo shaqeyneysa hindise ku aaddan miisaaniyadda dowladda.

Marka baarlamaanku uu arrin go’aan ka gaaryo, tusaale ahaan xeer cusub ama miisaaniyadda dowladda, waa xukuumadda shaqadeeda in ay go’aanka baarlamaanka meel mariso. Haddii xeer cusub ay ka dhalanayaan xuquuq cusub oo ay muwaadiniintu helayaan ama waajibaad fuulaya waxaa ay taasi isla mar ahaantaas ka dhigantahay hawlo shaqo oo laga rabayo in ay qabtaan hey’adaha dowladda ee arrinka ku shaqada leh.

Go’aamo wada jir ah

Xukuumaddu waxay dhammaan arrimaha xukuumadda ku gaartaa go’aamo wada jir ah oo lagu gaarayo kulanka xukuumadda oo dhaca hal mar usbuuciiba. Ugu yaraan shan wasiir waa in ay goob joog ahaadaan si ay xukuumaddu go’aan u gaari karto. Go’aamanka xukuumaddu waa meesha ugu dambeysa ee rasmiga ah ee geeddi socodka dheer ee go’aamanka. Badanaa go’aanka xukuumadda waxaa ka horreeya shaqo dhawr bilood qaadata oo heer sargaal ah. Mararka qaarkood waxaa dhici karta in arrinitu ay taabaneyso aagag mas’uuliyadeed oo ay kala leeyihiin wasirro badan. Mararka ay sidaas tahay waxaa si wada jir ah wax isula diyaarin kara shaqaalahooda. Dhammaan wasiirraduna waa in ay go’aanka isku waafaqsanyihiin inta aan lagu soo qaadin kulanka wada jirka ah ee xukuumadda. Ku dhawaa 7 000 oo go’aan xukuumadeed ah ayaa sanad walba la gaaraa.

Sidan ayey u shaqeeyaan xafiisyada dowladdu

Xafiisyada dowladdu waa hey’do dowladeed oo ay ka shaqeeyaan saraakiil sarsare oo shaqadoodu tahay in ay xukuumadda ka taageeraan sidi ay Iswiidhan u xukumi lahayd, ugana dhabeyn lahayd siyaasaddeeda. Xafiisyada dowladdu waxaa ay ka koobanyihiin Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, wasaaradaha, iyo Qeybta maamulka. Xafiisyada dowladda waxaa ka shaqeeya ku dhawaad 4 500 o shaqaale ah, oo ay ka mid yihiin ku dhawaad 200 oo qof oo loo qortay arrimo siyaasad la xiriira. Marka xukuumad la beddelayo

waa ay is casilayaan kuwa siyaasad ahaan loo soo magacaabay halka saraakiisha aan siyaasad ahaan loo shaqaaleysiinay ay shaqadooda sii haysanayaan.
Xafiiska Ra'iisul Wasaaruhu wuxuu hoggaamiyaa, iskuna duwaa shaqada Xafiisyada dowladda, waxaa uu mas'uul ka yahay isku duwidda siyaasadda Iswiidhan ee Midowga Yurub. Ra'iisul wasaaraha ayaa madax ka ah Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha. Hoggaanka wasaarad kasta waxaa iskula jira seddax wasiir, oo uu ka mid yahay kan wasaaradda madaxda ka ah.
Qeybta maamulka waxaa madax ka ah madaxa maamulka, oo ah sargaal sare. Saraakiisha sarsare waxay xukuumadda ka caawiyaan in ay aasaas u hesho, soona saarto hindisayaal ku aaddan go'aamada xukuumadda ee kala duduwan iyo in ay baaraan arrimo heer qaran ah iyo kuwo heer caalami ah intaba. Hawlaha shaqo ee ugu waaweyn waxaa ka mid ah arrimaha la xiriira sharci dejinta iyo arrimaha la xiriira miisaaniyadda. Saraakiisha sarsare waxay sidoo kale ka shaqeeyaan xakameynta hey'adaha dowladda ee wasaarad kasta hoos yimaada.
Shaqada Midowga Yurub (EU) wey taabaneysaa dhammaan hawlaha wasaaradaha, saraakiil sarsare oo ka kala socda dhammaan wasaaradaha ayaana Iswiidhan ku metela Midowga Yurub, arrimahana diyaariya kulamada Midowga Yurub ka hor.
Iswiidhan waxaa ay leedahay ku dhawaad 100 hey'adood oo dibadda ah. Hey'adaha dowladda ee dibaddu waxay ka koobanyihiin safaaradaheenna, wakiilladeenna wufuuddeenna iyo qunsuliyadaheenna. Ku dhawaad 400 ee qunsuliyad sharafeedka ah ayey hey'adahaasi si wada jir ah dibadda noogu metelaan.

Hawlaha xafiisyada dowladda

Madaxa wasaarad walba waa wasiirka. Wasaaradda waxaa ka tirsanaan kara wasiirro badan oo aan ahayn madaxa wasaaradda. Waxaa ay markaas ka mas'uul yihiin arrimo go'an oo muhiim ah. Wasiir kasta wuxuu leeyahay sargaal sare oo ah sargaal siyaasad ahaan loo magacaabay, tusaale ahaan xoghayaha dowladda, xeeldheere siyaasadeed iyo xoghayaha saxaafadda.

Wasaaradda shaqada

Aagagga mas'uuliyadda ee wasaaradda shaqada: siyaasadda nolosha shaqada, siyaasadda suuqa shaqada, siyaasadda isdhexgalka, arrimaha takooridda, xuquuqda aadanaha oo heer qaran ah, siyaasadda muwaadinnimada Iswiidhishka iyo dadka laga tirada badanyahay.

Wasaaradda maaliyadda

Aagagga mas'uuliyadda ee wasaaradda maaliyadda: siyaasadda dhaqaalaha, miisaaniyadda dowladda, siyaasadda canshuuraha, arrimaha suuqa maaliyadda, arrimaha qamaarka, iskaashiga dhaqaale ee caalamiga ah, shirkadaha ay dowladdu leedahay iyo dhaqaalaha la xiriira degmooyinka iyo sharci dejinta.

Wasaaradda gaashaan dhigga

Aagagga mas'uuliyadda ee wasaaradda gaashaan dhigga: difaaca guud, ilaalinta iyo u diyaargaroobidda shilalka, u diyaargaroobidda xaaladaha adadag, dadaallada taageeridda nabaddda ee caalamiga ah, shuruucda caalamiga ah marka ay jiraan khilaaf hubaysan iyo dadaallo ammaanka iyo sirdoonka la xiriira.

Wasaaradda kaabayaasha dhaqaalaha

Wasaaradda kaabayaasha dhaqaaluhu waxay mas'uul ka tahay arrimaha la xiriira xamuul qaadidda iyo kaabadaha dhaqaalaha, digitalgareynta iyo IT-ga, arrimaha boostada iyo tamarta

Wasaaradda caddaaladda

Aagagga mas'uuliyadda ee wasaaradda caddaaladda: Xeerarka aasaasiga ah iyo sharci dejinta ku aaddan shuruucda ciqaabta, shuruucda madaniga ah iyo hannaan socodka sharciyada, hey'adaha caddaaladda, siyaasadda qaxooyiga iyo megelyada, arrimaha cafinta ee kiisaska dembiyada iyo arrimo go'an oo kale oo ku aaddan kiisaska dembiyada, siyaasadda dimuquraadiyadda iyo arrimaha macaamiisha.

Wasaaradda hiddaha iyo dhaqanka

Aagagga mas'uuliyadda ee wasaaradda dhaqanka: dhaqanka iyo shuruudaha dhaqan abuuridda, hiddaha, warbaahinta, filmaanta iyo isboortiga.

Wasaaradda bii’ada
Aagagga mas’uuliyadda ee wasaaradda bii’ada: jawi maalmeed sun ka madax bannaan, cimilo, bado, biyo, kala duwanaasho noolaha la xiriira, daryeelka dabiicada, nidaamka hadafka bii’ada, iskaashiga caalamiga ee bii’ada la xiriira, wareeg-duuridda, ammaanka bu'da atamka iyo ilaalinta shucaaca, sharci dejinta xagga bii’ada iyo cilmi baarista xagga bii’ada.

Wasaaradda ganacsiga
Aagagga mas’uuliyadda ee wasaaradda ganacsiga: kobaca dhaqaalaha ee la xiriira goballada, tamarta, xamuul qaadidda iyo kaabayaasha dhaqaalaha, IT-ga iyo boostada iyo ganacsiga. Aagagga mas’uuliyadda waxaa soo gelaya shirkado yeelashada iyo qandaraaslenimada, awoodda tartanka iyo suuqaq si fiican u shaqeeya iyo cilmi baaris iyo hal abuurnimo baahida ku saleysan.

Wasaaradda arrimaha bulshada
Aagagga mas’uuliyadda ee wasaaradda arrimaha bulshada: daryeelka caafimaadka- iyo bukaanka, caafimaadka bulshada, xuquuqda carruurta, naafada, daryeelka dadka da’da ah, adeegga bulshada, ceymiska bukaanka, hawlgabka iyo taageerada la xiriirta dhaqaalaha ee qoysaska, maamulka dowladda, hoyga, wax dhisidda iyo ururro diimeedyada.

Wasaaradda waxbarashada
Aagagga mas’uuliyadda ee wasaaradda waxbarashada: dugsiyada xannaannada iyo iskoollada, jaamacadaha, cilmi baarista, waxbarashada dadka waaweyn, waxbarashada dadka naafada ah, iswiidhish u dhigidda dadka soo galootiga ah, hanuuninta dad weynaha, hawlaha la xiriira aadidda hawada sare, sinnaanta ragga iyo dumarka, siyaasadda dhallinyarada iyo siyaasadda loogu tala galay bulshada rayidka ah.

Wasaaradda arrimaha dibadda
Aagagga mas’uuliyadda ee wasaaradda arrimaha dibadda: siyaasadda arrimaha dibadda- iyo ammaanka, horuumarka caalamiga ah iyo mucaawinada, siyaasadda ganacsiga, caawinta Iswiidhishka dibadda jooga, xeerarka caalamiga ah iyo xuquuqda bani’aadanka, koontaroolidda waxyaabaha la dhoofiyo iyo qalabka dagaalka, iskaashiga caalamiga ah ee waddammada iyo goballada iyo taageeridda ganacsiga- iyo maalgashiga Iswiidhan.

Waxaa wasaarada ka dheeraad ah in uu sidoo kale jiryo urur guud:

Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha waxaa ay hawshiisu tahay in uu hoggaamiyo oo uu isku duwo shaqada Xafiisyada dowladda iyo in uu mas’uul ka noqdo isku duwidda siyaasadda Iswiidhishka ee Midowga Yurub. Xafiiska ra’iisul wasaaraha waxaa ka tirsan xoghaynta ra’iisul wasaaraha iyo wasiirka Midowga Yurub.

Qeybta maamulka
Qeybta maamulka waxay shaqadeedu tahay in ay ma’suul ka noqoto arrimaha guud ee maamulka wasaaradaha. Waxaana tusaale ahaan ka mid ah shaqada beddelidda iyo cusbooneysiinta Xafiisyada dowladda, dhaqaalaha hey’adda, arrimaha shaqa bixiyaha, shaqaaleysiinta dad aqoon leh, taageerada IT-ga, maktabadda, arkiifiyada iyo tixraac u sameynta qoraallada, iyo warbixinnada iyo isgaarsiinta.

Hey'adaha

Aag kasta oo mas'uuliyadeed oo wasaaradeed waxaa ka tirtan tiro hey'ado dowladeed oo ay tahay in ay xeerarka dabbaqaan, ayna fuliyaan hawlaha baarlamaanka iyo xukuumaddu ay go'aamiyaan. Laanta socdaalka iyo Laanta canshuuraha iyo diiwan gelinta dadweynaha ayaa dhawr tusaale u ah hey'adaha dowladda.

Sanad walba waxay xukuumaddu go'aan ku gaartaa warqad nidaamin ah oo loogu tala galay hey'adaha dowladda. Halkaas oo ay ku yaallaan hadafyada ay hey'adaha dowladdu hawlahooda ka leeyihiin iyo inta lacag ah ee ay hey'ad walba isticmaali karto. Micnahaa xukuumaddu waxay leedahay fursado ilaa heer ah oo ay ku xakameyn karto hawlaha hey'adahaas, laakin marnabaha ma xukumi karto sida ay hey'ad dowladeed u dabbaqeyso xeer ama go'aan uga gaareyso arrin gaar ah. Hey'adaha dowladdu iyaga ayaa waxaas si madax bannaan go'aan uga gaaraya, warbixinna u gudbiyaha wasaaradda. Waddamo badan waxaa ay wasiirradu awood u leeyihiin in ay toos hey'adaha shaqadooda ugu fara geliyaan. Iswiidhan awood noocaas ah wasiirradu ma laha. Taas waxaa caadi ahaan loogu yeeraa mamnuuc ahaanshada maamulidda wasiirka.

Geeddi socodka miisaaniyadda

Shaqada miisaaniyaddu waa geeddi soocod dheer oo billaabanaya in ka badan sanad ka hor sanadka miisaaniyaddu khuseyso. Geeddi socodku wuxuu Diseembar ka billawdaa in Wasaaradda maaliyaddu ay xukuumadda u soo bandhigto saadaal ku aaddan horuumarka dhaqaalaha bulshada. Bisha Maarso ayey xukuumaddu wada xaajood ka geleysaa dhanka ay miisaaniyadda dowladdu u jiheysaneyso. Jihada ugu muhiimsan ee sanooyinka soo socda waxaa lagu go'aaminayaa hindisaha guga ee dhaqaalaha la xiriira, ee bisha Abriil loo gudbinayo baarlamaanka.

Inta guga lagu jiro iyo xagaaga wasaaradaha ayey shaqadu ka sii soconeysaa, waxayna bisha Sabteembar xukuumaddu baarlamaanka u soo gudbineysaa hindise ku aaddan miisaaniyadda dowladda ee sanadka soo socda, hindisaha miisaaniyadda.

Inta uu baarlamaanku qaadaa dhigayo hindisaha miisaaniyadda waxaa ay wasaaraddu soo saareysaa warqadda nidaaminta ee loogu tala galay hey'adaha dowladda. Xukuumaddu waxay go'aan ka gaareysa warqadda nidaaminta ee ku socota hey'adaha dowladda inta uusan sanadku dhammaannin.

Geeddi socodka sharci dejinta

Baarlamaanka Iswiidhan ayaa go'aaman ka gaara xeerarka cusub. Xukuumadda ayaa soo billaawda hindisayaasha sharciyada badankooda. Ku dhawaad 200 oo hindise ayey xukuumaddu sanad walba u soo gudbisaa baarlamaanka. Hindisayaasha qaarkood waxaa ay soo jeediyaan sharciyo gebi ahaanba cusub, halka hindisayaal kale ay is beddel ku sameeyaan xeerar horay u jiray.

Baaritaanno iyo guddiyo

Arrimaha ay xukuumaddu ka shaqeyso qaarkood xallintoodu wey ka dhib badanyihiin kuwo kale. Marka ay xaaladdu sidaas tahay waxay xukuumaddu u magacawdaa baare gaar ah (hal qof) ama kuddi (koox ka kooban dhawr qof) oo arrinka baaraya. Xukuumaddu waxay hawsha ku qeexeysaa wax loogu yeero tilmaan ku socota baaraha ama guddiga. Natiijada waxaa lagu ururinayaa warbixin noqoneysa bannaanyaal oo cid walba u furan.

Marka ay xukuumaddu rabto in ay dabbaqdo xeer cusub sidan ayey badanaa wax u dhacaan:

1. Baritaan dowladeed waxaa loo magacaabaa si arrin loo baaro. Guddi ama hal qof ayaa waxaa loo diraa hawl ah in uu baaro duruufaha ku xeeran waxa ay xukuumaddu dooneyso in ay meel mariso. Xudduudaha loo jeexay hawsha waxaa lagu sheegayaa waxa loogu yeero tilmaamidda guddiga.
2. Marka uu baaritaanku dhammaado warbixin ayuu baaruhu ama guddigu qorayaa.
3. Warbixinta waxaa loo dirayaa hey'adaha dowladda, ururrada, degmooyinka iyo qeybaha kale ee muhiimka ah oo aragti ka soo gudbinaaya, waxa loogu yeero jawaabta gudbinta. Haddii meelo fara badan oo loo gudbiyay aysan wanaag waxa ku arkin

Waxaa dhici karta in go'aan lagu gaaro in aan arrinka horay loo sii wadin, ama in la isku dayo in la helo xalal kale oo aan ahayn kuwa baaritaanku soo jeedinayo.

4. Warbixinta waxaa sidoo kale loo dirayaa Guddiga sharciyada oo dhanka sharciyada ka eegaya.
5. Xukuumaddu hindise, soo jeedin, ayey dabadeed baarlamaanka u qoreysaa.
6. Mid ka mid ah guddiyada joogtada ah ee baarlamaanka ayaa hindisaha argtadiisa ka dhiibanaya (fikirka guddiga joogtada ah).
7. Baarlamaanku wuxuu u codeynayaa hindisaha. Haddii la oggolaado waxaa xeer cusub lagu soo saari karaa meesha lagu ururiyo dastuurka Iswiidhishka, SFS.

Qaar ka mid ah xeerar Iswiidhan khuseeya waxaa lagu dejiyaa Midowga Yurub. Xeerarka Midowga Yurub uu dejiyo qaarkood toos ayey Iswiidhan uga shaqeeyaan iyadoo uusan baarlamaanku arrinka go'aan ka gaarin.

Qaabka bulshada Iswiidhishka

Nidaam dimuquraadi ah oo leh doorasho xor ah

Iswiidhan waa waddan dimuquraadi ah oo baarlamanteeriyaan ah, taasoo ka dhigan in awoodda dowladda oo dhan ay shacabka ka imaaneyso. Sharciyada waxaa dejiya baarlamaan ka kooban 349 xildhibaan oo shacabku doortaan afarti sanaba hal mar. Doorasho kasta ka dib wuxuu afhayeenka baarlamaanku soo gudbiyanaa hindise ku aaddan ra'iisul wasaare cusub. Ra'iisul wasaaraha waxaa dooranaya baarlamaanka, waxaana loo xil saarayaa in uu xukuumad soo dhiso.
Rasmi ahaan Iswiidhan waa boqortooyo sharci ku dhisan oo boqor Carl XVI uu dowladda madax u yahay. Boqurku wuxuu leeyahay door iska maqaar saar ah oo madaxtinimo dowladeed ah oo gebi ahaanba shaqadiisu la xiriirtu dabbaaldegyada oo keliya.

Marka doorashooyinka guud Iswiidhan laga qabanayo ku dhawaad toddoba milyan oo xaq u leh in ay codeeyaan ayaa fursad u helaya in ay ka qeyb qaataan oo saameyn ku yeeshaan cidda shacabka ku meteleysa baarlmaanka, maamul gobaleedyada iyo degmooyinka.

Si aad seddaxda doorasho uga codeysid waa in aad ugu dambeyn maalinta doorashada buuxisaa 18 sano.

Marka laga reebo in la codeeyo waxaa jira siyaabo kale oo siyaasadda Iswiidhishka loo saameyn karo. Dhawr tusaale waxaa ah in xisbi siyaasdeed lagu biiro, in aragti laga dhiibto warbixinnada guddiyada iyo baaritaannada, iyo in laga qeyb qaato afti dadweyne.

Sidoo kale shantii sanaba hal mara ayaa la qabtaa doorashada baarlamaanka Midowga Yurub, midka keliya ee hey'adaha Midowga Yurub ka mid ah ee toos loo doorto. Dhammaan dadka muwaadiniinta ka ah waddan xubin ka ah Midowga Yurub, kuna diiwaan gashan Iswiidhan wey ka codeyn karaan Iswiidhan.

Qaabka maamulka ee Iswiidhishka

Iswiidhan waxaa loo xukumaa heer qaran, heer gobal iyo heer hoose ah. Intaas waxaa ka dheeri ah heerka Midowga Yurub.

Heer qaran

Barlamaanka, oo awood u leh in uu sharciyo dejiyo, shacabka ku metelaya heer qaran. Xukuumadda ayaa Iswiidhan xukunta iyadoo fulineysa go'aamanka Baarlmaanka, billaabeysana xeerar cusub iyo kuwo wax laga beddelayo. Caawimaad ahaan waxay xukuumaddu shaqadeeda u heysataa Xafiisyada dowladda iyo hey'adaha dowladda.

Heer gobal

Iswiidhan waxaa ay u qeybsantahay 21 maamul gobaleedyo. Gobal kasta waxaa ka jira hey'ad gobal oo dowladeed, guddiga gobalka. Hey'ado go'an oo kale oo dawladeedna waxay sidoo kale ka shaqeeyaan heer gobal iyo heer hoose. Waxaa jira 20 gobal. Xubinta ugu sarreysa ee go'aanka leh waa golaha gobalka.

Xeerarka degmooyinka ayaa xukuma hawlaha gobalka laakin waxaa jirta fursad is xukumid, micnaha in go'aanka degmo walba ama gobal walba lagu gaaro qeybtaas iyada ah.

Heer hoose

Iswiidhan waxaa ka jira ku dhawaad 290 degmo. Degmooyinka ayaan mas'uul ka ah inta badan adeegyada bulshada ee ka jira meesha aan deggannahay. Hawlahooda ugu muhiimsan waxaa ka mid ah dugsigyada xannaannada, iskoollada, adeegga bulshada iyo xannaannada dadka da'da ah. Degmooyinka waxaa xukuma siyaasiyiin ay dadku doorteen. Xubinta ugu sarreysa ee go'aamada gaarta waa golaha degmada. Xeerarka degmooyinka ayaa xukuma hawlaha degmada laakin sida heerka gobalba waxaa jirta fusad is xukumid.

Heerka Yurub

Iswiidhan waxay hoos timaadaa xeerarka Midoga Yurub, weyna ka qeyb qaadataa hannaanka looga shaqeynayo, laguna go'aaminayo xeerar wada jir ah oo cuscusub. Xukuumadda ayaa Iswiidhan ku metesha golaha Yurub iyo golaha Midowga Yurub, oo badanaa loogu yeero golaha wasiirrada ama guddiga oo go'aaminaya khadadka loo marayo iskaashiga mustaqbalka. Ra'iisul wasaaraha ayaa sidoo kale iska leh mas'uuliyadda guud ee horuumarinta iyo isku duwidda siyaasadda Iswiidhan ee Midowga Yurub.

Xeerarka aasaasiga ah ee Iswiidhan

Xeerarka aasaasiga ah wey ka sarreeyaan dhammaan xeerarka kale, mana jiryo xeer kale oo ka hor imaan kara xeerarka aasaasiga ah. Sidoo kalana looma beddeli karo si u fudud xeerarka kale. In la beddelo waxay u baahantahay in baarlamaanku uu laba jeer oo kala duduwan isla go'aanka gaaryo. Waana xitaa in doorasho kale oo barlamaan ay dhacdo inta u dhexeysa labada go'aan. Xeerarka aasaasiga ah waxay khuseeyaan qaabka dowladda, dimuquraadiyadda, habka boqortooyo dhaxlidda, xorriyadda hadalka, xorriyadda saxaafadda iyo xorriyadaha- iyo xuquuqda kale ee aasaasiga ah:

- Dib u habeynti xukuumadda ee sanadkii 1974 ayuu ku jiryaa xeerka aasaasiga ah ee qaabka dowladda, sida ay xukuumaddu u shaqeyneyso, xuquuqda- iyo xorriyadaha aasaasiga ah ee dadka Iswiidhishku ay leeyihiin iyo sida doorashada baarlamaanku ay u dhaceyso.
- Nidaamkii isku xigxigsashada ee sanadkii1810 ayaa nidaaminaya sida taajka boqortooyada loo kala dhaxlayo, micnaha cidda boqor noqoneysa iyo cidda boqorad noqoneysa.
- Xeerkii xorriyadda saxaafadda ee1949 ayey tusaale ahaan ku jiraan xeerarka ku aaddan xorriyadda saxaafadda iyo xaqa loo leeyahay in wax laga helo dukumiintiyada guud.
- Xeerkii aasaasiga ahaan ee xorriyadda hadalka ee1991 ayaa nidaaminaya xorriyadda hadalka ee xagga raadiyaha, TV-ga, filmaankta iyo warbaahinta la midka ah.

Xuquuqda bani'aadanka

Mas'uuliyadda ku aaddan in aan xuquuqda bani'aadanka meel looga dhicin waxay dulsaarantahay baarlamaanka, xukuumadda iyo dhammaan hey'adaha dowladda, goballada iyo degmooyinka. Hadafka fog ee xukuumaddu waa in la xaqiijiyo in si buuxda Iswiidhan looga ixtiraamo xuquuqda bani'aadanka.

Iswiidhan waxaa xuquuqda bani'aadanka lagu ilaaliyaa haddey noqon lahayd xeerarka aasaasiga ah iyo haddeyn noqon lahayd xeerarka kale iyo qaraarrada xukuumadda. Waxaan intaas dheer in laga soo billaabo 1995 ay Iswiidhan ka shaqeynayaan heshiiska Yurub ee ilaalinta xuquuqda bani'aadanka iyo xorriyadaha aasaasiga ah. Waxaa xitaa jira heshiisyo kale oo dawladaha ka dhexeeya oo go'minaya xuquuqda bani'aadanka.

Shaqada xukuumadda ee ku aaddan xoojinta iyo ilaalinta xuquuqda bani'aadanka ayaa isku toleysa haddey noqon lahayd siyaasadda qaranka iyo haddey noqon lahayd siyaasadda dibadda qeybaheeda oo dhan.

Sinnaanta ragga iyo dumarka

Iswiidhan waxaa waqti dheer ka jiray dhaqan ah in laga shaqeeyo arrimaha sinnaanta ragga iyo dumarka. Sinnaantu waxaa ay ka dhigantahay in ragga iyo dumarku ay isku xuquuq yihiin, iskuna fursado yihiin aag kasta oo nolosha ka mid ah. I Sverige finns en lång tradition av att arbeta med jämställdhetsfrågor, tusaale ahaan in ay isku shuruudo yihiin suuqa shaqada, wadaagaan mas'uuliyadda guriga iyo carruurta iyo sinnaanta xagga dhaqaalaha.

Laakin weli qeybsashada awoodda iyo saameynta ee u dhexeysa ragga iyo dumarku waxay u muuqataa in ay kala duwantahay qeybaha bulshada. Siyaasaddu waxay ka mid tahay aagagga ugu sinnaanta badanne xagga jisniga. Baarlamaanka qeybta dumarku waa ku dhawaad 46 boqolkiiba, ragguna waa 54 boqolkiiba. Aagagga kale, sida xagga cilmiga, dhaqanka, warbaahinta, kaniisadda Iswiidhishka iyo ganacsiga waxaa jirta tiro yar oo dumar ah oo boos hoggaamineed haysata. Xagga ganacsiga ayey heysashada raggu ugu badantahay, in kasta oo ay sanooyinkaan dambo jiraan wax isbeddello ah.

Bannaanyaalnimo

Mabda'a bannaanyaalnimada

Mabda'a bannaanyaalnimadu wuxuu ka dhiganyahay in go'aamada hey'adaha dowladda, baarlamaanka iyo hawlaha golayaasha degmooyinka ee go'aanka gaara ay intii suurta gal ah ahaadaan kuwo dadka u furan. Si loo xaqiijiyo ka warheynta shaqada ayaa mabda'a dukumiintiyada guud lagu qoray xeerarka aasaasiga ah, qaraarka xorriyadda saxaafadda.

Mabda'a bannaanyaalnimadu wuxuu dhammaan dadka xaq u siinayaa in ay wax ka helaan dukumiintiyada guud. Dukumiintiyada soo gaara ama ka baxa Xafiisyada dowladda iyo hey'adaha kale ee dowladda, tusaale ahaan go'aaman iyo baaritaannadu badanaa waa bannaanyaal. Xeerka ugu muhiimsan waa in dhammaan dukumiintiyada yimaada ay diiwan geliso hey'addi qabatay.

Xasuus qorka iyo qoraallada feegaarka caadi ahaan looma arko in ay yihiin dukumiintiyo guud. Qofki doonaya in uu ogaado dukumiinyada ay hey'adi heyso ama uu doonayo in uu wax ka helyo wuxuu la xiriirayaa hey'adda.

Mabda'a bannaanyaalnimadu wuxuu sidoo kale ka dhiganyahay in saraakiisha iyo dadka kale ee u shaqeeya dowladda, degmooyinka iyo maamul gobaleedyadu ay xaq u leeyihiin xorriyadda sheegidda. Waxay taasi ka dhigantahay in ay xaq u leeyihiin in ay wax sidooda kale sir ahaan lahaa, marka laga reebo macluumaad gaar ah, u sheegaan tusaale ahaan warbaahinta, iyadoo aan taas lagu ciqaabi karin, uusanna shaqa bixiyuhu isku dayi karin in uu ogaado cidda macluumaadka bixisay.

Wakiillo

Nidaamka wakiilladu waa wax muhiim ah si loo damaanad qaado furfurnaanta qeybaha dowladda, mafhuumka waxaa lagu faafiyay waddamo kale oo fara badan.

Iswiidhan waxaa ay leedahay wakiillad rasmiga ah ee soo socda:

Wakiilka caddaaladda (JO) – ama wakiillada baarlamaanka sida rasmi ahaan loogu yeero – waxaa dooranaya baarlamaanka si uu u koontaroolo in hey'adaha dowladdu ay raacayaan xeerarka markaas shaqeynaya iyo qaraarrada kale ee la xiriira shaqadooda.

Xeer ilaaliyaha guud (JK) waxay shaqadiisu tahay in uu xukuumadda kor uga ilaaliyo hey'adaha dowladda iyo maxkamaduhu iyo in uu dowladda ku metelo murunnada maxaakiimta, uu nidaamiyo megdhawyada dowladda lagu sheegto, oo xeer ilaaliye ka noqdo kiisaska xorriyadda hadalka- iyo saxaafadda iyo in uu xukuumadda kala taliyo xagga sharciyada.

Wakiilka macaamiisha (**KO**) wuxuu maxkamadaha ka difaacaa danaha macaamiisha ee ku aaddan shirkadaha. Hawsha ugu muhiimsan ee KO waa in ay koontaroosho in shirkaduhu ay raacayaan xeerka suuq geynta, xeerka shuruudaha heshiiska, xeerka ammaanka badeecooyinka iyo xeerka meel fog- iyo guri wax ku iibinta.

Wakiilka takooriddu (DO) wuxuu hubiyaa in xeerka takooridda la raaco.

Wakiilka carruurtu (BO) wuxuu metelyaa xuquuqda carruurta- iyo dhallinyarada iyo danahooda isagoo ka duulaya heshiisyada caalamiga ah ee Qaramada Midoobay ee ku aaddan xuquuqda carruurta.

Wakiilka carruurta- iyo ardayda (BEO) waxay hawshiisu tahay in uu si waafaqsan xeerka iskoollada u ilaaliyo xuquuqda carruurta- iyo ardayda.

Koontaroolidda dowladda

Guddiga joogtada ah ee dastuurku, KU, waa guddi baarlamaan oo koontaroola sida ay waajibaadkooda u gutaan wasiirrada dowladdu iyo sida ay xukummaddu arrimaha u maareyso. Waxaa intaas dheer in KU ay diyaariyaan arrimo tusaale ahaan khuseeya xeerarka aasaasiga ah, ndiaamka baarlamaanka iyo doorashada xisaabiyaha qaranka.

Xisaabiyaha qaranka, oo ah hey'ad baarlamaanka hoos tagta ayaa koontaroosha hey'adaha dowladda iyo hawlahaada, koontarooshana ina y raacaan tilmaamooyinka, shuruucda iyo xeerarka iyo in ay hadafyadooda gaarayaan, micnaha in xukuumadda iyo hey'adaha kale ee dowladdu ay shaqadooda ka adagyihiin.

Hey'adaha dowladda qaarkood iyaguna sidoo kale waa hey'ado kor wax ka ilaaliya, micnaha waxay hawshoodu tahay in ay hawlaha koontaroolaan. Dowladdu waxay koontarlooshaa, sidaasna ku taageertaa shaqada maamul gobaleedyada, goballada iyo degmooyinka. Hey'adda kormeerka iskoolladu waxay tusaale u tahay hey'ad kor wax ka ilaalisa oo kormeerta iskoollada, si ay u aragto in ay raacayaan xeerarka iyo sharciyada.

Iswiidhan iyo caalamdka

Iswiidhan iyo Midowga Yurub

Laga soo billaabo 1 Jannaayo 1995 waxay Iswiidhan xubin ka tahay Midowga Yurub ka dib markii sanadkii 1994 la qaaday afti dadweyne. Xubinnimadu waxay ka dhigantahay in Iswiidhan ay ka qeyb qaadaneyso shaqada Midowga Yurub, ayna fursad u heysato in ay saameyso go'aamada la gaarayo.

Ilaa iyo ama amar dambe Iswiidhan kuma jirto midowga lacagta iyo dhaqaalaha ee EMU ee tusaale ahaan ka dhigan in waddamada xubnaha ka ah ay Euro si wadajir ah lacag ahaan u heystaan. Bishii sabteembar 2003 ay afti dadweyne loo qaaday in Iswidhan ay midowga lacageed ka mid noqoneyso iyo in kale. Natiijadu waxay noqotay in 55,9 boqolkiiba ay Maya ku jawaabeen.

Ku dhawaad 1200 oo Iswiidhish ah ayaa ka dhex shaqeeya Midowga Yurub. Qaar iyaga ka mid ah waxay metelaan Iswiidhan iyo danaha Iswiidhishka halka kuwo kale ay shaqooyin kala duduwan oo ka heystaan maamulka Midowga Yurub, tusaale ahaan Guddiga Yubuiyaanka ah.

Iswiidhan iyo Qaramaa Midoobay

Iswiidhan waxay Qaramada Midoobay, QM, xubin ka noqotay 1946, sanadki ka dambeeyay marki ururka la dhisay. Laga soo billaabo waqtigaas in si firfircoon leesugu xilqaamo hawlaha Qaramada Midoobay waxay qeyb muhiim ah ka ahayd siyaasadda Iswiidhishka ee arrimaha dibadda.

Xukuumadda Iswiidhan oo taageero ballaaran baarlamaanka ka haysata waxay wada shaqeynta Qaramada Modoobay u aragta waxa ugu muhiimsan ee lagu saxi karo arrimaha waaweyn ee caalamiga ah ee badbaadinta caalamka. Hawshaasu waxay u baahantahay Qaramada Midoobay oo xoog leh iyo iskaashi dhaw oo lala yeesho ururrada maxalliga ah, waddammada gaar-gaar ah iyo bulshada rayidka ah ee caalamka oo dhan.

Laga soo billaabo 1960-aadkii waxay Iswiidhan ka qeyb qaadatay tiro fara badan oo ka mid ah hawlaha Qaramada Midoobay ee nabad ilaalinta. In ka badan 70 000 oo Iswiidhish ah ayaa sanooyinkaas u shaqeeyay Qaramada Midoobay, tiro fara badan oo Iswiidhish ah dhexdhexaadiyayaal ahaan ayey ugu shaqeeyeen Qaramada Midoobay.

Iswiidhan waxay si ballaaran uga shaqeysaa dhinacyo kala duduwan oo ka mid ah aagagga shaqada ee Qaramada Midoobay. Waddanku wuxuu ka mid yahay waddamaha billaaba arrimaha muhiimka ah. In la joojiyo ciqaabta dilka, xuquuqda carruurta, in la joojiyo habkii medeb kala sooca ee waddankii koonfurta Afrika, heshiiska caalamiga ah ee jirdilka, iyo aagagga ku aaddan hub dhimista, bii'ada iyo la dagaallanka maandooriyuhu waxay tusaalooyin u yihiin arrimo ay Iswiidhan isu xilqaanta. Iswiidhan sidoo kale waa mid ka mid ah deeq bixiyayaasha ugu waaweyn ee shaqada horuumarinta dhinacyaa badan ee ururrada xubnaha ka ah Qaramada Midoobay.

Iskaashiga waddamada Woqooyin Yurub

Iskaashiga rasmiga ah ee u dhexeeya waddamada Woqooyiga Yurub waa mid ka mid ah kan ugu weyn uguna ballaaran iskaashiyada caalamiga ah. Iskaashiga siyaasaddu wuxuu ku dhisanyahay qiyam aasaasi ah oo wadajir ah iyo rabitaan ah in la gaaro natiijo gacan ka geysaneysa horuumar firfircoon iyo kororka aqoon-iyo karteeyeed iyo awoodda tartanka ee Waddamada Woqooyiga Yurub.

Golaha Waddamada Woqooyiga Yurub

Golaha waddamada Woqooyiga Yurub, ee la dhisay 1952 waxaa ku jira 87 xubnood oo golaha ka tirsan oo ka kala yimid Danmark, Finland, Island, Norway, Iswiidhan, Feerooar, Goroonland iyo Ooland. Xubnuhu waxay ku jiraan baarlamaannada waddamadaas, waxaa magacaaba xisbiyadooda, waxaana doorta baarlamaanka. Golaha Waddamada Woqooyiga Yurub doorasho toos ah looma qabto.

Golaha wasiirrada ee waddamada Woqooyiga Yurub

Golaha wasiirrada ee Waddamada Woqooyiga Yurub waxaa la dhisay 1971, waana xubinta wadashashaqeynta ee xukuumadaha Waddamada Woqooyiga Yurub. Golaha wasiirradu, inkasta oo uu magacu siyaas yahay, maaha mid keliya ee golayaal wasiirro oo fara badan. Tiro fara badan oo ah wasiirro ka kala socda wasaarado kala duduwan ayaa dhawr jeer ku kulma golaha wasiirrada. Waxaa kuwaas ka reebban wasiirro ay ka mid yihiin wasiirrada arrimaha dibadda- iyo gaash dhigga oo dibadda ka jooga golaha wasiirrada ee Waddamada Woqooyiga Yurub. Taasi dabcan wasiirradaas woqooyiga Yurub kama reebeyso in ay kulmaan.

Macluumaad rasmi ah oo Iswiidhan ku saabsan

Magaalo madax: Stockholm
Dad weynaha: Ku dhawaad 10 milyan oo muwaadin ah
Cimri dhexaadka: Ragga ku dhawaa 81 sano, dumarka ku dhawaa 84 sano
Luqadda: Iswiidhish. Luqado qaran oo dad laga tira badanyahay oo la aqoonsanyahay: finska, samiska, meänkieli, romani chib, jiddisch
Habka xukunka: boqortooyo sharci ku dhisan, dimuquraadiyad baarlamaani ah

Baarlamaanka: baarlamaan hal aqal ah oo ka kooban 349 xildhibaan. Kuwaas oo ay ka mid yihiin 46,1 boqolkiiba oo dumar ah iyo 53,9 boqolkiiba oo rag ah (2018)
Bedka: 450 000 km², waddanka seddaxaad ee ugu weyn galbeedka Yurub
Lacagtya: Koron (SEK)

Macluumaad dheeraad ah:
www.regeringen.se (svenska) www.government.se (engelska)
www.sweden.se

Tira koob dheeraad ah:
www.scb.se

Xiriir

Taleefan
Xiriirinta xafiisyada dowladda: +46 8 405 10 00

Boosto
Wasaaradaha oo dhan: 103 33 Stockholm

E-mail
Eeg www.regeringen.se